

BEERASHADA DHIRTA YARYAR


Dhirtu waxay leedahay faaiidooyin dhanka dawada ah, dhanka aragga, deegaanka, iyo dhanka wax karinta. Inta badan waxay u baahan tahay ilaalin yar iyo biyo yar markii la hirgaliyo. Waxay u muuqdaan inay soo jiidanayaan cayayaanka inta ugu tiro yar. Dhir badan ayaa si fiican uga baxda gudaha guryaha ama bannaanka!

KU BEERIDDA BANNAANKA

A. IFTIINKA: Dhir badan ayaa u baahan ugu yaraan lix saacadood oo qorraxdu si toos ah ifkeedu ugu baxayo maalintii. Inta badan iftiinka qoraxda ee geedahaagu helaan, in dhan ayaa saliid ay yeeshaan oo waxaa xoogooba dhadhanka iyo udugga geedka. Meelaha kujeeda ifka qorraxda ee koofurta iyo galbeedka ujeeda ayaa ugu wacan in dhirta lagu beero. Haddii aysan helin iftiin ku filan maalin kasta, dhirtu waxay noqon kartaa mid caato ah oo daciif ah.

B. BIYO: Qoo carra ku hareereysan salka geedka si carradu u huurto ilaa 8 inji qoto dhan asbuucii. Arrinkaan waxaa lagu xaqiijinayaa in xididada geedku ay helaan biyo kufilan.

C. SOO GOYNATA: Waxaad soo goyn kartaa dhirta xilliga wax beerashada oo dhan adoo soo jaraya qeybta saddexaad ee sare ee geedka. Dhir badan ayaa yeelan doonta dhadhanka ugu wacan haddii la goosto wax yar ka hor ubxinta. Saacadaha subaxdii waa waqtiga ugu fiican ee la goosan karo geedo yaryar sababtoo ah sayaxa ayaa badanaa markaa qallalay taasoo gacan ka geysata in geeduhu lahaadaan saliid badan.



KU BEERIDDA GUDAHA GURIGA

Si loo beerto dhir yaryar, waxaa ugu wacan in la leeyahay dariishado dhanka koofureed ujeeda. Haddii aadan lahayn dariishada dhanka koofureed ujeeda, goanso inaad beerato geedo yaryar oo u dul qaadan kara ifka qorraxda ee aan tooska ahayn sida geedka nacnaca, bay, rosemary, thyme, geedka liinta iyo tarragon. Waxaad inaad isku badbadasho weelasha geedahaaga yaryar si geeduhu ugu kobcaan si joogto ah. Isku day inaad isticmaasho had iyo jeer heerkulka gudaha inta u dhaxaysa 55-70 ° F si aad u hesho dhir caafimaad leh.

DHOWRID



4-5 jirrid
bandhalkiiba
si loo dhawro

HAWADA KU QALLAJI: Haddii aad hayso waqti iyo goob, inaad hawada ku qallajiso geedahaaga yaryar ayaa ah xulasho fiican. Habka qalajinta oo tartiib tartiib ah ayaa kaa caawinaya ilaalinta dhadhanka geedaha. Marka hore, aayar biyo raaci dhirtaada oo daa ha qallashee. Intaas kadib qaado 4-5 jirrid oo isku xirxir adoo xarig isticmaalaya oo u war si madaxoodu fooraro gudaha qol diirran oo mugdi ah oo qallalan oo hawo fiican ay soo galayso. Caleemaha waxay qaadan doonaan 7-14 maalmood inay qalalaan.

MICROWAVE: Microwave inaad dhirta ku qallajiso waxay noqon kartaa xulasho ilaalineed oo wacan haddii waqtigu kugu yaryahay. Ayadoo laga yaabo in saliidu kaa dhunto waxoogaa, microwave inaad ku qallajiso geedaha waa hab waxtar leh oo wax lagu qallajiyo. Marka hore biyo raaci dhirta oo daa ha qallashee. Intaas kadib ka goo caleemaha jirridaha oo saxan saar. Microwave saxanka dhex gali 15 ilbiriqsi markiiba ilaa dhirtu aad u qalasho. Waxaad ku tijaabin kartaa microwave ilaa aad heshi si aad u borogaraamiso oo si habboon u qallajiya dhirta.

KAYDINTA: Marka caleemaha geeduhu qalalaan, ka jar jirridaha (haddii aadan sidaa horay uyeelin). Kurid caleemaha dhirta weel aysan hawo soo galeyn oo xir weelka. Dabadeed ku kaydi geedaha meel qabow, mugdi ah oo engegan ilaa hal sano.

QABOOJIN: Ku buuxi qayb kasta oo ka mid ah saxaarada barafka ilaa kala bar caleemaha geedaha yaryar. Intaas kadib saliid ku shub dhammaan saxaarada barafka ilaa ay ka qariso geedahaaga. Gali saxaaradda qaboojiyaha oo isticmaal hadba sida loogu baahdo. Tixgeli inaad qaboojiso tiro yar sababtoo ah dib uma qaboojin kartid dhirta markay dhalaasho kadib.

Ilaha: UMass Center for Agriculture, Food, and the Environment, Missouri Botanical Garden, University of Minnesota Extension, Penn State Extension. Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden